



Rachel Miller, M.Ed.

Macalin Bixiya Taageer Dheeraad Ah (Resource Teacher)

Barnaamijka Wacyigelinta Caafimaakda Galmada

p (619) 725.7121

f (619) 725.7127

rmiller@sandi.net

www.sandiegounified.org/SHEP

FOOMKA OGEYSIINTA WAALIDKA

U Kuurgalka Dhaqanka Dhalinyarada Ee Halista Ah Ee 2019 (Youth Risk Behavior Survey 2019)

Waaxda Ciyaaraha, Wax Barashada Jir Dhiska, Caafimaadka iyo Wanaagsanaanta Ee Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego (Athletics, Physical Education, Health and Wellness Department of San Diego Unified School District) ayaa iyadoo khaashanayso Xarumaha Xakamaynta Iyo Ka Hortaga Cudurada (Centers for Disease Control and Prevention [CDC]) rabto inuu cunugaaga ka qayb-qaato U Kuurgalka Dhaqanka Dhalinyarada Ee Halista Ah Ee 2019 (2019 Youth Risk Behavior Survey [YRBS]). U kuurgalka (survey) wuxuu cabirayaa waxyaabaha ay dhalinyarada ku dhaqmaan oo keeni karo cuduro iyo dhimasho. U kuurgalkaan waxaa lagu uruurin doonaa maclumaad ku saabsan caafimaadka oo khuseeyo meelaha soo socda: isticmaalka tubaakada, habka uu qofka wax u cuno (dietary behaviors), dhaqdhaqaaqa jirka (physical activity), cabitaanka khamriga iyo isticmaalka daroogada, dhaqanka la xiriira galmada, iyo waxyaabaha uu qofka ku dhaqmo oo sababo dhaawac iyo rabsho oo kas ah ama aan kas ahayn.

U kuurgalkaan waxaa marki ugu horeysey degmada dugsigeena laga bixiyey markey ahayd 1991 ilaa markaasna waxaa loo bixinaayey sanad dhaaf. Maadaama aan isku fiirin karno natiijooyinka u kuurgalka hada la bixinaayo iyo natiijooyinka u kuurgalyaasha hore, waxaan arki karnaa siduu dhaqanka ardayda isku bedelaayo ama meeshu u socdo. Maclumaadkaan wuxuu haggaa go'aamada aan ka gaareyno hirgelinta barnaamijyo caafimaad oo loogu talagalay ardayda joogo degmada dugsigeena.

Waxyaabaha gaarka u ah ardayda si taxadar leh ayaa loo ilaaliyaa. U kuurgalkaan waa magac la'aan (anonymous). Lama rabo inay ardaydu xogwareysigaan (questionnaire) ku qoraan magacooda ama galaaskooda ama magaca dugsigooda. Qiyaas ahaan lixdan galaas (fasalada 9-12) oo ka socda dugsiyada sare ee degmada dugsiga oo tiradoodu ah 24 ayaa ka qayb-qaadan doona u kuurgalkaan 2019.

Xogwareysiga YRBS oo ku qoran luuqado badan iyo natiijooyinka u kuurgalyaashi hore ayaa ka heli kartaa www.sandiegounified.org/YRBS. Sidoo kale dugsiga cunugaaga ayaad ka eegi kartaa xogwareysiga oo ku qoran Ingiriis ama Isbaanish. Hadii aad qabtid su'aalo, fadlan la xiriir Rachel Miller oo laga heli karo (619) 725-7121 ama rmiller@sandi.net.

Hadii aad rabin inuu cunugaaga ka qayb-qaato u kuurgalkaan, fadlan saxiix meesha hoos ku taalo oo loogu talagalay saxiixa markaas foomkaan u soo celi macalinka galaaska uu cunugaaga dhigto ilaa Febraayo 1, 2019.



Rachel Miller, M.Ed.

Macalin Bixiya Taageer Dheeraad Ah (Resource Teacher)

Barnaamijka Wacyigelinta Caafimaakda Galmada

p (619) 725.7121

f (619) 725.7127

rmiller@sandi.net

www.sandiegounified.org/SHEP

MA RABO inuu cunugeyga ka qayb-qaato U Kuurgalka Dhaqanka Dhalinyarada Ee Halista Ah Ee 2019 (2019 Youth Risk Behavior Survey).

Dugsiga: _____

Magaca Ardayga: _____

Magaca Waalidka/Wakiilka: _____

Saxiixa Waalidka/Wakiilka: _____